



## Qaab cusub oo ku sabsan sida loo dalbado gaadiidka dugsiga sannad dugsiyeedka 21/22

Annagu waxa aanu adiga ku xasuusinaynaa in aad adigan ah qofka masuulka ka ah ilmaha ama waalidka ah carruurta dhigata dugsiga hoose, marka laga reebo ardayda dhigata dugsiga gaarka ah, waa in aad ku dalbataa gaadiidka dugsiga adeegyadeena cusub ee elektaroonigga ah. Wax kaararka dugsiga ah lama diri doono ama dib looma buuxin doono in uun codsi la samayn mooyee.

Codsiyada sannad dugsiyeedka soo socda waa in la sameeyaa 2021-03-22 – 2021-04-09 si loo hubiyo in go'aanka ku saabsan gaadiidka dugsiga uu diyaar yahay bilowga sannad dugsiyeedka billaabmaya bisha agoosto.

Adeegga elektaroonigga ah waxaa laga heli karaa bogga internetka ee degmada laga billaabo 2021-03-22 oo waxaana soo galidda lagu sameynayaa aqoonsiga elektaroonig ah. Haddii aadan haysan aqoonsi elektaroonig ah, waxa aad ka helaysaa adiga bangigaaga.

Waqtigan hadda xaadirka ah, ardayda qoys aqaleed lagu meeleeay iyo dadka leh tiro qofeed ku meelgaarka ah ayaa loo tilmaamayaa arjiga warqadda foomka ah. Foomka waxaa laga heli karaa: Xarunta xiriirka degmada

Ujeedada isbedelka kan ahi waa, wax ay ka mid tahay in la wanaajiyo, khadka baska oo si fiican loo qorsheeyey iyo sidaas darteed saamaynta deegaanka oo yaraata iyo sidoo kale kharashka oo la yareeyo. Haddii aad su'aalo horey u qabtid, u leexo iyaga xarunta xiriirka ee degmada Falu.

**023-830 00**  
**kontaktcenter@falun.se**

**falun.se/skolskjuts**